



WAR SAXAAFDEED

Muqdisho, Maarso, 03 2021

UJEEDO: WARGELIN KU SAABSAN ISTICMAALKA 50KA DOOLAR

Sida la wada ogyahay isticmaalka lacagta Doolarka (USD) waxay door weyn ka qaadataa dhaqaalaha dalka. Waayadan danbe waxaa jiray warar sheegaya in bankiyada ganacsiga iyo xawaaladaha qaarkood ay joojiyeen isticmaalka lacagta 50ka Doolar gebi ahaanba. Arrintan oo ka dhalatay warar aan sugnayn oo lagu faafiyay baraha bulshada, kuwaas oo sheegayey inay suuqyada lacagta soo galeen lacago been-abuur ah oo konton-konton doolar ah (50 dollar notes).

Bankiga Dhexe ee Soomaaliya isaga oo ka duulaya waajibaadkiisa shaqo ee la xiriira xasillooni-da hab-maaliyadeedka dalka, wuxuu baaritaan qoto dheer ku sameeyey xogta la xiriirta lacagaas been abuurka ah ee la sheegay, isagoo xiriir la sameeyay Bankiyada gaarka loo leeyahay iyo xawaaladaha ka hawlgala dalka oo dhan.

Baaritaan ka dib, Bankiga Dhexe wuxuu maanta shir arrintan ku saabsan la yeeshay ururrada iyo madaxda bankiyada iyo xawaaladaha, waxaanna ka soo baxay qodobadan:

1. Bankiga Dhexe wuxuu ku wargelineynaa dhamaan shacabka Soomaliyeed in aysan jirin sabab gaar ah oo looga walaaco isticmaalka 50ka doolar iyo qeybaha kale ee lacagta doolar ka toona.
2. Bankiga Dhexe wuxuu farayaa dhamaan Bankiyadda, Xawaaladaha iyo Ganacsata kaleba in ay socodsiiyaan isticmaalka 50ka Doolar, si la mid ah lacagaha kale ee doolarka.
3. Ugu dameyn, Bankiga Dhexe ku adkaynayaa xawaaladaha iyo bankiyada ganacsiga inay mar walba ka feejignaadaan iskuday kasta oo ku aaddan been-abuurka lacageed, nooca ay doonto ha'ahaatee. Ciddii qabata lacag been-abuur ah waa inay warbixin degdeg ah usoo gudbiso Bankiga Dhexe, si hay'adaha fulintu waajibaadkooda uga gutaan.

Wixii faah-faahin dheeraad ah waxaa lagala soo xiriiri karaa Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

-Dhamaad-

